WAAXDA XAAFADDA SEATTLE

BARNAAMIJKA WAX BEERIDDA BULSHADA P-PATCH

Barnaamijka wax Beerida Bulshada P-Patch waxa uu ka koobanyahay meelo bannaan oo ay bulshadu maamusho oo ku yaal Xaafadaha Seattle. Beerayaasha shaqsi ahaan iyo guud ahaanba, waxay isticmaalaan gabollo yar oo dhul ah si ay uga beeraan cunto , ubaxyo, khudrad iyo geedo.

Beeruhu waa kuwo ufuran dadwayanaha si ay ugu raaxaystaan. Beer walbaaba waa gaar, oo waxyaabaha ay ka koobantahay waxaa kujiri kara meelo lagu raaxaysto, kuraas, farshaxan, beero ubax, calaamado wax barasho, tusaalayn waaridda dabiici, iyo beeraha carruurta.

FAAHFAAHINTA BARNAAMIJKA

Barnaamijka Wax beerida Bulshada P-Patch waxaa abaabulay Waaxda Xaafadaha Seattle. Laga soo bilaabo Diisambar 2016, waxaa jira 90 beerood oo bulshada P-Patch ah, 3055 dhulo yaryar, iyo 6800 beerarayaal.

Beeraha P-Patch waxay leeyihiin taariikho kala duwan oo waxay ka shaqeeyaan baahiyo kala duwan. Beertii ugu horaysay, oo ahyn Beerta Picardo, waxaa sameeyay 1973 kii koox deegganayaal bulshada ahaa iyo magaalada Seatlte. Beeraha waxa lagu dhisaa milkiyadda dowladda oo ay leeyihiin waaxaha kala duwan ee magaalada iyo mulkiilayaal kale oo dawladeed iyo kuwa gaar ahba. Beeruhu waxay u dhaxeeyaan kuwo yar-yar ilaa kuwo waawayn, iyo qaab iskaashato (dhul wadaag) ilaa beero waawayn oo suuq ahaan loogu talagalay (cunto ay beeraan beerayaal dakhligoogu hooseeyo si ay u iibiyaan).

XAQIIQOOYIN XIISO LEH

Goobta ugu da'weyn: Picardo (2.5 acres)

Goobta ugu ballaaran: Thistle (3+acres)

Lambarka # goobaha Salal Kacsan ee Marinka Leh: 18

Goobta ugu cusub: Troll's Knoll

Goobta ugu yar: IdaMia (700 square feet)

Lambarka # Beeraha Ganacsiga: 3

Seattle Neighborhoods

P-PATCH COMMUNITY GARDENING PROGRAM

Waaxda Xaafadda Seattle

BARNAAMIJKA WAX BEERIDDA BULSHADA P-PATCH

XAQIIQOOYIN BARAAMIJ INTAA KA BADAN

GUUSHA LOO MARAYO ISKAASHIYADA

Intaa waxa dheer shaqada shaqaaleheena, beeraha bulshada P-Patch ayaa magoola dadaalka ururo badan iyo beerayaasha laf ahaantooda.

- Solid Ground's Lettuce Link
- GROW
- Seattle Tilth
- Seattle Housing Authority
- 6800+ gardeners oo ku tabaruca 42,000 saacadood sannadkii

BEERAHA BULSHADA P-PATCH AAD LOO RABO

Maadaama dalabku aad u sareeyo, shaqaalahu waxay ka shaqeeyaan inay koriyaan awooodda, sidoo kale waxay taageeraan dadaalada beeridda ee bulshooyinka kale:

- 1,000+ dad ah ee ku jira Liiska rabitaanka (laga bilaabo Diisambar 2016).
- Waqtiga sugitaan ee beerahara shaqsiyadu waxa ay u dhexeeyaan 3 bilood iyo 4 sano.
- Isbeddelada sannadka oo ka gudba celcelisyada barnaamijka oo dhan 25%.

BARNAAMIJYADA LOOGU TALOGALAY DADKA DAKHLIGOODU HOOSEEYO IYO DADWEYNAHA TABASHADA LEH

Mid ka mid ah qiimaheena asaasiga ah waa inaanu taageerno dadka dakhligoodu hooseeyo iyo dadka tirada yar. Mid ka mid ah tusaale ahaan waa Barnaamijka Beerta Suuqa. Qoysaska dakhliga hoose iyo kuwa ajnabiga ah ee ku nool guryaha Seattle Housing Authority iyo inay beerta uga iibiyaan wax soosaarkooda dadka deegaanka. 2016, 14 beeralay oo matalaya shan dhaqamadood ayaa iska kaashaday in ay bixiyaan wax soosaarka lagu iibinayo beerta iyo barnaamijka beeraha bulshada taageera (CSA).

Barnaamijku sidoo kale waxa uu bixiyaa caawimaad maaliyadeed. 2016, in ka badan 550 oo qoys oo ka socday 73 beeraha P-Patch ayaa helay gargaar.

Fiiga Beerta

Dhulalka beeruhu waxa lagu maamula cabbiro kala duwan:
10' x 10' – $43
10' x 20' – $57
10' x 40' – $85

Gargaar maaliyadeed ayay heli karaan kuwa aan awoodin inay bixiyaan khidmadda beerta.

Khidmad sannadeedka waxa u dheer, siddeed saacadood oo wakhti tabaruc ah ayaa loogu baahan yahay si loo haysto aagagga dad-

BEERUHU WAXAY TAAGEERAN BANGIGA CUNTADA SAYO

- 53 Beerood ayaa leh baranaamijka xaaxabidda ama loo qoondeeyay "siinta beeraha" qoyska ay cuntadu uga baxdo bangiyada cuntada iyo barnaamijyada cuntada diirran.
- Beertayaasha ayaa ku deeqay in ka badan 24,178 rodol oo wax soo saar ah sannadkii 2016.

MALUUMAADKA LAGALA XIDHIIDHO

Barnaamijka Beeridda Bulshada ee P-Patch
Waaxda Xaafadda Seattle

Telefoon: (206) 684-0264
Iimayl: p-patch.don@seattle.gov
Bogga internetka: www.seattle.gov/neighborhoods/ppatch/

2017_03_24; SO